2025 Ogaysiinta Sannadlaha Xubinta

Xubinta Qaaliga ah,

Waad ku mahadsantahay ka mid noqoshada qoyska Molina Healthcare. Waxaan aaminsanahay in qof kasta uu u qalmo inuu dareemo sida ugu fiican, iyo in helitaanka daryeel tayo leh ay tahay mid sahlan.

Ogeysiintaan Sannadlaha ah wuxuu kaa caawinayaa inaad wax ka barato Molina Apple Health (Medicaid) iyo faa'idooyinka Apple Health Expansion. Waxay sidoo kale dib u eegayaan barnaamijyada iyo adeegyada bilaashka ah ee la heli karo si ay u taageeraan baahiyahaaga daaweynta caafimaadkaaga jireed iyo dabeecadeed (caafimaadka maskaxda iyo cilladda isticmaalka muqaadaraadka).

Sida xubinta Molina, waxaad tahay qayb ka mid ah qorshooyinka caafimaadka Apple ee ugu sareeya gobolka, #1 ee Dooqa Macmiilka[1] ee loogu tallogalay dadka iska diiwaan geliya Apple Health iyo #1 ee Waxqabadka Tayada ee Kaarka Warbixinta Caafimaadka Apple.[2]

[1] Inta badan xubnaha doorta qorshahooda caafimaad bil kasta, waxay doortaan Molina.

[2] Sida ku saleysan Kaarka Warbixinta Qorshaha Caafimaadka Sannadlaha Washington Apple.

25 sanno oo ku joogteynta Washington fiicnaan!

Faa'idooyinka BILAASHKA ah oo keliya loogu tallogalay xubnaha Molina Apple Health!

Ookiyaalaha dhaqtarka qoro

Si qurxoon u ekaaw. Si wanaagsan xitaa wax u arag. Xubnaha Molina (da'aha 21+) waxay ka heli karaan ookiyaalaha dhaqtarka qoro ee bilaashka ah Zenni Eyewear! Ka dhex xulo in ka badan 55 nuuc onleenka, oo ay ku jiraan muraayadaha labada dhinac iyo kuwa guud. Isku tijaabi hab onleyn ahaana (adoo isticmaalaya mobeelkaaga casriga ah, tablet-kaaga ama kombuyuutarka). Muraayadahaaga la sameeyo ee dalabka ah ayaa toos loogu keenaa albaabkaaga.

Halkaan waa sida loo bilaabo:

- Ka booqo molina.zennioptic.com mobeelkaaga casriga ah oo kaamirada leh, kumbuyuutarka, mobeelka ama tabletka.
- Xaqiiji warbixinta xubin ahaaned.
- Isticmaal Aalada Fogaan aragga Isku-Tijaabinta Zenni.
- Geli daawadaada dhaqtarka ama sawir ka qaad daawadaada dhaqtarka oo ku xareey.
- Ka dooro naqshadahaaga aad jaceshahay.

Xubinnimada Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha

Molina waxay dabooshaa khidmadda xubinnimada sannadlaha ee xubnaha (da'da 6-18) ee ka qaybqaadanayo Naadiyada Wiilasha & Gabdhaha ee gobolka Washington.

Xubinimada, canugaaga wuu ku raaxeysan karaa:

- Helitaanka naadiga inta lagu jiro saacadaha furan, oo ay ku jiraan dugsiga kadib. Goobaha qaarkood waxay furanyihiin goor dambe sida 7:30 p.m.
- Helitaanka Naadiga Xagaaga.
- Barnaamijyada dugsiga kadib waxay diirada saaraan qaab nololeedka caafimaad ahaan, taageerada jirdhisnaanta iyo layliga guriga.
- Cuntada fudud ama cunto bilaash ah (oo ay bixiyaan naadiyada intooda badan).
- Gaadiid ka imaado dugsiga canugaaga ee aado Naadiga (oo ay bixiyaan naadiyada qaarkood).
- Iyo wax badan!

Si aad isaga diiwaangelisid:

- Tus Kaarkaaga Aqoonsiga Xubinta Molina ee Naadigaaga Wiilasha & Gabdhaha ee deegaankaaga.
- Waxaad sidoo kale booqan kartaa Washingtonclubs.org/locations si aad u raadiso Naadi kuu dhow.

Fiiro gaar ah: Faa'idada Naadiga Wiilasha & Gabdhaha Molina waxay daboolaan qidmada xubinnimada kaliya. Naadiyada qaarkood waxay qiimeeyaan qidmada ka qeybqaadashada bil-laha ah, taasoo ah masuuliyada xubinta. Deeqda waxbarashada dheeraadka ah ayaa laga yaabaa in la helo – fadlan la hadal Naadigaaga Wiilasha iyo Gabdhaha degaankaaga si aad wax badan uga barato.

Barnaamijka Abaalmarinada Xubinta

U kac illaa **$200** sannadkiiba oo abaalmarinada sameynta dooqyo caafimaad sida qaadashada baaritaanada daryeelka fayo qabka, daryeelka uurka, iyo maareynta caafimaadkaaga guud.

Helitaanka abaal-marinnadaada* hadda way fududahay! Waxaad ku gudbin kartaa macluumaadkaaga adoo isticmaalayo boggaaga xubinta ee MyMolina.com.

Si aad wax badan uga barato oo aad u aragto liiska adeegyada abaal-marinta ee adiga iyo qoyskaaga, booqo MolinaHealthcare.com/WA-Medicaid-Wellness.

**Abaalmarinada caafimaadka way isbadeli karaan iyadoon ogeysiin jirin. Xayiraadaha way quseyn karaan.*

Cuntooyin caafimaadan isbitaal jooga kadib – Molina waxay siisaa cuntooyin xubnaha isbitaal jooga kadib. Cuntooyinkeena caafimaad ahaan ku xiran waxaa lagu bixiyaa iyadoo la kaashanayo Mom's Meals®. Looma baahna diyaarin. Xubnaha waxay heli karaan:

- Laba cunto maalintii illaa 14 maalmood.
- Cunto diyaar u ah in la cuno 2-3 daqiiqo gudahood.

La hadal tababarahaaga Daryeelka Ku meelgaarka Molina si aad u ogaato haddii aad u qalanto.

Barnaamijka Caawinta Taleefanka Casriga ah** – Xubnaha u qalma waxay heli karaan qorshaha adeegga gaarka ah ee Molina oo ay ku jiraan:

- **BILAASH AH** Hadal aan xadidneyn
- **BILAASH AH** Fariin qoraal aan xadidneyn
- **BILAASH AH** Wicitaan Caalami ah***

Booqo truconnect.com/molina ama soo wac (844) 700-0795.

Molina waxay si sharaf leh ula shaqeysaa TruConnect.

Daryeelka degdega ah ee fogaan aragga – Ma u baahan tahay daryeel laakiin aadan shaqsi ahaan u tagi karin xafiiska dhaqtarkaaga? Daryeelka degdega ah ee fogaan aragga, waxaad kala hadli kartaa dhaqtarka ay guddiga-xaqiijiyen 24 saac maalintii, todoba maalmood isbuuca oo dhinaca taleefonka ama muuqaalka. Balan looma baahna. U hel daryeel degdeg ah cudurada fudud sida:

- Qabowga, dhuun xanuun iyo caabuq sanka
- Xasaasiyadaha iyo daafka indhaha
- Iyo wax badan!

Iska diiwaangeli akoonkaaga Molina oo kala hadal dhakhtar: Teladoc.com/MolinaWa ama ka soo wac (800) 835-2362 (TTY: 711) si aad u bilowdo.

Qidmooyinka isticmaalka xogta ayaa laga yaabaa inay quseyso.

My Molina mobile app - Soo dagso app-keena xubinta oo gelitaan degdeg ah ee warbixintaada caafimaadka. App-ka ayaa kuu fududeeyo:

- Arag kaarkaaga Aqoonsiga xubinta
- Raadi dhaqaatiir iyo rugaha caafimaadka
- Iyo wax badan!

ISKAAN ISAAR

Doorbido isticmaalka kumbuyuutar? Booqo MyMolina.com.

Molina Help Finder – Molina's Help Finder waa aalad kugu xiro adeegyada bilaashka iyo qarashka hoose ee bulshadaada, sida:

- Guriyeynta
- Tababarka shaqada
- Taageerada cuntada
- Waxbarashada
- iyo wax badan!

Booqo MolinaHelpFinder.com si loo bilaabo.

***Faa'idadaan waxaa loogu tallogalay xubnaha u qalma faa'idooyinka FCC's Lifeline and Affordable Connectivity Program (ACP).*

****Dalalka la doorto waxaa ka mid ah Mexico, Canada, China, South Korea iyo Vietnam.*

BILAASH AH fogaan arag taageerada soo kabsiga iyo caafimaadka damiirka kaliya waxaa loogu tallogalay xubnaha Molina Apple Health!

Molina waxay iskaashi la sameysaa dhowr bixiyeyaalka caafimaadka taleefonka iyo aaladaha casriga ah▲ si ay kuu siiyaan daryeelka caafimaadka dabeecada onleenka oo badqab iyo sugan. Caawinta fogaan aragga waxaa loo helayaa adeegyada daaweynta caafimaadka damiirka, aalkulada, daroogada iyo cudurka isticmaalka muqaadaraadka. Wax badan ka baro MolinaHealthcare.com/memberWA.

Bixiyayaasha caafimaadka dabeecada – caawinta raaxada gurigaaga

- **Caafimaadka Dabeecada Teladoc** waxay bixiyaan daaweynta fogaan aragga iyo taageerada walaaca, niyad-jabka, murugada, caqabadaha xiriirka iyo wax badan. Teladoc, waxaad si qarsoodi ah ula hadli kartaa daaweeyayaasha shatiga leh, cilmi nafsiilayaasha ama dhaqaatiirta dimiirka. Booqo Teladoc.com/MolinaWA ama ka soo wac (800) 835-2362 (TTY 711).
- **Boulder Care** waxay bixisaa daaweynta qarsoodiga ah iyo taageerada cudurka isticmaalka muqaadaraadka, oo ay ku jiraan cudurka isticmaalka daroogada (OUD) iyo cudurka isticmaalka alkulada (AUD). Booqo Boulder.care/Molina ama ka soo wac (888) 608-0836 (TTY: 711).
- **Bicycle Health** waxay bixiyaan taageerada qarsoodiga ah ee cudurka isticmaalka daroogada. Tan waxaa ku jira ballamaha caafimaadka fogaan aragga iyo kulamada kooxda soo kabsiga – dhammaan iyadoo loo marayo hal app oo fudud in la isticmaalo. Booqo BicycleHealth.com/Partners/Molina ama ka soo wac (628) 732-0998 (TTY: 711).

Pyx Health app – caawinta kalinimada iyo welwelka – Ma dareemeysaa kalinimo ama murugo? App-ka **Pyx Health app** Wuxuu bixiyaa dhiirogelin maalinle ah iyo tallooyinka soo kabsiga. Ku roonow maalin walba wehelka iyo kaftan loo marayo taageerada tejnoolijiyada iyo shaqaalaha naxariista leh. Soo dagso "Pyx Health" ee ku jira Apple App Store ama Google Play. Wax badan ka baro MolinaHealthcare.com/memberWA.

BeMe app – fayo qabka caafimaadka damiirka ee dhalinta – **BeMe** waxaa loogu tallogalay dhalinta (da'aha 13-19). Waxay ka caawisaa dhalinyarada inay maareeyaan walbahaarka, dhisaan kalsooni, wanaajiyaan xiriirada, oo ay la socdaan caqabadaha sida xoog sheegsiga iyo walbahaarka. Tababarka tooska ah iyo taageerada dhibaatooyinka ayaa sidoo kale la helayaa. Ka dagso "BeMe" Apple App ama Google Play Store.

▲ Qidmooyinka isticmaalka xogta way quseyn kartaa.

Daryeel tayo leh ee loogu tallogalay dhammaan xubnaha Apple Health oo bilaash kugu ah!

Faa'idooyinka hoose waxaa helayaa dhammaan xubnaha Apple Health ee gobolka Washington.

Daryeelka taqasuska oo bixiyayaasha tayada sare ayaa u suurtogalayo inay daaweeyaan baahiyahaaga. Balamaha waxay noqon karaan qof ahaan (ama dhinaca qadka caafimaadka, haddii uu bixiyo bixiyaha).

Maareynta daryeelka oo lagu taageero xubnaha qaba xaaladaha daba dheeraado oo u baahan caawin dheeraad ah oo lagu xiriirinayo daryeel oo lagu maareynayo jirooyinka socdo. Tan waxay ka mid tahay ku meelgaarka daryeelka oo hal meel ku meel kale iyo ku meelgaarka ka baxsan xabsiga.

Barnaamijyada iyo adeegyada gaarka ah waxaa loo heli karaa xaaladaha sida ootiisamka, umusha qatarta sare ku jirto iyo qaliinka cayilka.

Adeegyada LGBTQIA+ iyo daryeelka jinsiga xaqiijinayo Caawimad waa la heli karaa oo waxaa loogu tallogalay inay ku daaweyso xubnaheena si naxariis iyo xushmad leh inagoo gacan ka geysaneyna ka saarida caqabadaha daryeelka. Waxaan gacan ka geysanaa hubinta in dhammaan xubnaha ay helaan taageero si ay u gaaraan caafimaadkooda ugu wanaagsan, ha ahaato safarkooda jinsiga ama helitaanka adeegyada ku haboon iyo dhaqan ahaan xog ogaal ah.

Adeegyada dhibaatooyinka waxaa la heli karaa wakhti kasta. Haddii adiga ama qof aad taqaan uu ku jiro niyad-jab dareen ama qatar, waxaa jira dad tababaran oo ku caawin kara.

- Xiriirada Dhibaatooyinka Goboleedka
- Qadka Caawinta Soo kabsiga Washington
- 988 Qadka nolosha Isdilka iyo Dhibaatada, soo wac ama fariin qoraal u dir 988, ama la sheekeyso 988lifeline.org

Wixii xaalado degdeg ah, soo wac 911.

Khadka Tallo bixinta Kalkaalisada ee 24-saac ah waxay kugu xireysaa kaaliso u qalanta oo tallada caafimaadka ah. (888) 275-8750 (TTY: 711) Ingiriis iyo Luuqado kale.

DentistLink ayaa kaa caawin kara raadinta dhaqtarka ilkaha deegaanka kaasoo aqbalo caymiska Apple Health.

Daryeelka ka hortaga waxay ka dhigantahay tallaabo qaadida caafimaad lagu ahaado, sida helitaanka baaritaanada sannadlaha, tallaalada, baaritaanada caafimaad iyo daryeelka uurka.

Adeegyada daaweynta cudurka isticmaalka muqaadaraadka si ay u taageeraan safarkaaga soo kabsiga oo ay ku jiraan daryeelka bukaan socodka iyo bukaan jiifka, maareynta ka noqoshada (sun ka saarida), iyo taageerada soo kabsiga asxaabta.

Adeegyada caafimaadka damiirka si ay kaaga caawiyaan maareynta welwelka, niyad-jabka iyo fayo qabka dareenka ee guud. Tan waxaa ku jira adeegyada qiimeynta iyo daaweynta.

Barnaamijyada iyo waxbarashada maareynta caafimaadka si ay kaaga caawiso gaarista hab nololeed caafimaadan. Barnaamijyada waxaa ku jiro sigaar joojinta, maareynta miisaanka, aaladaha lagula noolaado niyad jabka iyo wax badan.

Gaadiidka aado balamaha caafimaadka daawada iyo dabeecada. Gaadiidka waxaa lagu daboolay dhinaca kaarka adeegyada Washington Apple Health iyo ProviderOne.

Faa'idooyinka farmashiyaha si ay kaaga caawiyaan inaad heshid daawada aad uga baahantahay inaad wanaagaaga dareento. Ka eeg liiska daawooyinka la daboolay MolinaHealthcare.com.

Daawada dhaqtarka oo 90-maalmood dib u buuxinta waxaa lagu buuxin karaa daawooyin gaar ah ee muddada dheer si ay kuugu fududeyso.

Adeegyada turjubaanka iyo fasiraada waa la heli karaa haddii aad ku hadasho luuqad aan ka aheyn af Ingiriis. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: MolinaHealthcare.com/WA. Waxaad sidoo kale booqan kartaa bogga Adeegyada Turjubaanka ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) hca.wa.gov/interpreter-services.

Macluumaadka loogu tallogalay iska diiwaangeliyayaasha Apple Health Expansion

Apple Health Expansion waa barnaamij loogu tallogalay in lagu siiyo caymiska daryeelka caafimaadka dadka da'doodu tahay 19 iyo ka weyn ee leh qaanuunada qaar ee socdaalka. Apple Health Expansion waxaa ku jira adeegyada ugu badan ee ku daboolan barnaamijyada Apple Health Expansion.

Adeegyada qaarkood ee lagu heli karo sida waafaqsan Apple Health Expansion waxaa ka mid ah:

- Adeegyada caafimaadka Medical iyo dabeecada
- Adeegyada ilkaha
- Gaadiidka u socdo iyo ka imaado balamaha ay daboolaan Apple Health
- Adeegyada turjubaanka
- Farmashiga (daawooyinka dukaanka laga iibsado iyo dhaqtarka qoro ee Liiska Daawada La doorbido ee Apple Health)
- Qalabka aragga (ee loogu talagalay iska diiwaangeliyayaasha da'doodu tahay 19-20)

Adeegyada qaarkood laguma heli karo sida waafaqsan Apple Health Expansion. Kuwaan waxaa ka mid ah, laakin kuma xadina:

- Adeegyada la xiriiro uurka iyo uurka kadib
- Baaritaanka hore iyo xilliyeedka, ogaanshaha iyo daaweynta (EPSDT)
- Kormeerka taageerada
- Xanaanada waajibaadka gaarka ah
- Daryeelka xarunta xanaanada muddada dheer
- Barnaamijka Caafimaadka Guriga

Wax badan ka baro buug-yarahaaga xubinta ee: MolinaHealthcare.com/IMCHandbook.

Aan isku xirnaano

Sida xubinta Apple Health, mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad sameyn kartid waa cusbooneysiinta warbixinta xiriirkaaga. Tan waxay kaa caawineysaa inaad hubiso inay kuu suurtogaleyso inaad hesho daryeelka aad u baahantahay marka aad u baahantahay. Waxay sidoo kale kuu ogolaaneysaa inaad hesho aqbaaro iyo xasuusiyayaal muhiim ah.

Macluumaadkaaga xiriirka waxaa ka mid ah:

- Lambarka taleefonka
- Ciwaanka i-meelka
- Cinwaanka boostada

Cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka oo leh laba hay'adood oo caafimaadka muhiimka ah kuwaasoo u baahan kara inay kula soo xiriiraan:

1. **Molina Healthcare**
    - Ka Wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165 (TTY: 711) si aad u cusbooneysiiso dhammaan warbixintaada xiriirka oo ay ku jiraan ciwaankaaga boostada, ama booqo MyMolina.com.
    - Waxaad sidoo kale cusbooneysiin kartaa lambarka taleefonkaaga iyo i-meelka ee app-ka mobeelka My Molina
2. **Washington Healthplanfinder**
    - Ka soo wac (855) 923-4633 (TTY: 855-627-9602), ama booqo WAHealthPlanFinder.org si loo cusbooneysiiyo dhammaan warbixintaada xiriirka.

Barnaamijka Hormarinta Tayada (QI)

Barnaamijka QI ee Molina wuxuu si firfircoon u xaqiijiyaa in xubnaheena iyo bixiyeyaashayadu ay hayaan illaha, aaladaha iyo warbixinta looga baahanyahay in lagu taageero natiijooyinka caafimaadka xubnaha ee la hormariyay.

Barnaamijka QI:

- Hubi inaad heli kartid kooxda caafimaadka u qalanto
- Dib u eegista iyo tallaabo qaadida haddii ay jiraan arin tayada daryeelka ah ee lagu siiyay
- Ku jawaabaa oo wax ka qabtaan baahiyaha kala duwan dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan ee xubnaheena
- Waxay sare u qaadaa badqabka daryeelka caafimaadka xubnaheena iyo bixiyayaasheena
- Wuxuu ku qiimeeyaa tayada daryeelka caafimaadka dhinaca cabirada HEDIS®
- Wuxuu kormeeraa ku qanacsanaanta xubinta oo loo marayo sahanada CAHPS®
- Waxay siisaa xubnaha waxbarashada iyo illaha caafimaadka, sida:
    - Hagaha Lagu helo Daryeelka Caafimaadka Tayo leh - wuxuu sharaxaa sida loo helo faa'idooyinka, barnaamijyada iyo adeegyada
    - Hagaha Ku Korida iyo Joogteynta Caafimaadka - wuxuu sharaxaa adeegyada loo baahanyahay iyo goorta ay tahay in la dhameystiro
    - Hagaha Wadada Fayo Qabka - waxay bixisaa qariirada booqashooyinka daryeelka caafimaadka muhiimka ah ee carruurta iyo dadka weyn
    - Tallooyin Caafimaad Joogteynta - waxay wadaagaan warbixin waxtar leh oo ku saabsan maareynta xaaladaha raaga
    - Wargeyska Xubinta - waxay bixisaa maqaalo waxbarashada caafimaadka waxtarka leh

Haddii aad jeclaan laheyd inaad wax ka ogaato Barnaamijka Molina's QI, booqo MolinaHealthcare.com/WAQIProgram.

Su'aalo maqabtaa?
Booqo MolinaHealthcare.com ama ka soo wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165 (TTY: 711).

Si ay kaaga caawiyaan inaad nala soo xiriirto, Molina waxay ku bixisaa caawin ay ku jiraan adeegyada turjubaanka, qoraalada ku qoran daabacaad weyn, qoraalo qoran oo loo turjumay luuqadaada; ama loo bedelay qaababka ay ku jiraan maqal, qaababka elektarooniga la heli karo iyo Qoraalka camoolaha.

Sida daryeel loogu helo baahiyahaaga caafimaadka jireed iyo dabeecada:

1. **Soo wac bixiyayaashaada PCP iyo caafimaadka dabeecada**

   PCP waxay u taagan tahay bixiyaha daryeelka koowaad. PCP gaaga waa bixiyahaaga gaarka ah (dhaqtarka). PCP gaaga wuxuu daryeelayaa inta badan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ee joogtada ah. Waxay dib u eegayaan natiijooyinka baaritaanka, qor daawooyinka oo ku gudbiyo bixiyayaal kale (taqasusyada), haddii loo baahdo.

   Bixiyahaaga caafimaadka dabeecada wuxuu daryeelayaa baahiyaha daaweynta caafimaadka damiirkaaga iyo/ama cudurka isticmaalka muqaadaraadka. Haddii aad la kulmeysid dhibaatada caafimaadka damiirka, **soo wac ama fariin qoraal usoo dir 988**, ama la xiriir **khadka dhibaatada deegaankaaga**. Wixii xaalado degdeg ah, soo wac 911.

   Haddii aysan kuu suurtogaleynin inaad uga qeybgasho balanta qof ahaan, weydii bixiyeyaashaada haddii ay bixiyaan qadka caafimaadka (dhanka taleefonka ama daryeelka muuqaalka). Molina waxay dabooshaa ballamaha qadka caafimaadka haddii uu bixiyo bixiyahaaga shabakada.

   Haddii aadan haysan bixiye ama aad u baahantahay inaad bedesho bixiyahaaga, booqo MolinaProviderDirectory.com/WA ama ka soo wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165 (TTY: 711)

   Adeegyada farmashiiga

   Haddii aad u baahantahay inaad hesho farmashiye, booqo: MolinaProviderDirectory.com/WA.

   Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ee daawooyinka laguu qoray, soo wac farmashiyahaaga ama bixiyaha kuu qoraya. Haddii aad qabtid su'aalo gaar ah oo ku saabsan faa'idooyinka farmashiyaha Molina, soo wac Adeegyada Xubinta

   (800) 869-7165 (TTY: 711).

2. **La hadal wakiilka Molina**

   Wakiilada Adeega Xubinteena ayaa ka jawaabi kara su'aalaha ku saabsan qorshahaaga ama caymiska daawada, ku siinayo macluumaadka caafimaadka, kugu caawiya raadinta bixiye iyo wax badan.

   Adeegyada Xubinta: (800) 869-7165 (TTY: 711), furan Isniinta-Jimcaha, 7:30 am-6:30 pm PT.

3. **Hayso faa'idooyinkaaga**

Si aad u cusbooneysiisid caymiskaaga caafimaadka ama weydii su'aalo ku saabsan u qalmidaada Apple Health, xiriirka:

- Adeega Macmiilka ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington: (800) 562-3022, TRS: 711
- Washington Healthplanfinder ee (855) 923-4633, (TTY: 711) ama booqo wahealthplanfinder.org

Haddii aad qabtid su'aalo si gaar ah ula xiriira faa'idooyinka xubinta Molina, fadlan ka soo wac Adeegyada Xubinta Molina (800) 869-7165 (TTY: 711) ama booqo MolinaHealthcare.com.

4. **Akhri dukumentiyada muhiimka ah**

Akhriso Ogeysiinta Dhaqamada Asturnaanta-Sirta ee Molina si aad u fahamto sida Molina u illaaliso asturnaantaada.

Ka aqriso Buug-yarahaaga Xubinta MolinaHealthcare.com/IMCHandbook si aad u fahamto faa'idooyinkaaga iyo sida loo helo daryeelka aad u baahantahay.

Si aad u hesho dukumentiyadaan ama macluumaadka xubinta Molina oo luuqad ama qaab kale ah, fadlan ka wac Adeegyada Xubinta (800) 869-7165 (TTY: 711).

Buug-yarahaaga Xubinta ayaa wax kaaga sheegayo:

- Faa'idooyinka caymiska ku jiro iyo kuwaan ku jirin ceymiska
- Sida loo helo adeegyada caafimaadka damiirka
- Sida loo helo adeegyada daaweynta cudurka isticmaalka muqaadaraadka
- Waxa la sameeyo haddii aad biil heshid
- Sida caawin loo helo haddii aad ku hadashid luuqad aan af Ingiriis aheyn ama haddii aad u baahantahay inaad ku hesho isgaarsiin qaab kale sida maqal, qaababka elektarooniga la heli karo ama Qoraalka camoolaha
- Sida loo helo xaqiiqooyinka ku saabsan bixiyeyaasha qandaraaska la galay Molina
- Sida loo helo taqasus, caafimaadka damiirka iyo daryeelka isbitaalka
- Sida cabasho loo sheego
- Sida ay Molina dib ugu eegto tejnoolijiyada cusub
- Jiheynada Hore ee daryeelka ka dhigo dooqyada daryeelkaaga caafimaadka ee caafimaadka jireed iyo damiirka mid qoraal ah ee ku socoto bixihayahaaga iyo qoyska
- Adeegyada loo heli karo inay ka caawiyaan maareynta xaaladaha daba dheeraado
- Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadaha Xubinta
- Barnaamijka Hormarinta Tayada Molina
- Faa'idooyinka daawada laguu qoray
- Faa'idooyinka aaga ka baxsan iyo sida loo helo daryeel
- Sida dib loogu eego jiheynta bixiyaha
- Sida loo helo daryeelka koowaad
- Sida loo helo daryeelka degdega ah iyo daryeelka saacadaha shaqada kadib
- Sida looga racfaan qaato go'aanka ku saabsan faa'idooyinkaaga
- Sida iyo goorta la helo adeegyada maareynta dacwada
- Sida Molina u siiso lacag bixiyayaasha
- Sida loo soo sheego qiyaanada daryeelka caafimaadka, dayacaada ama xadgudubka

Waad ku mahadsantahay inaad xubin ka tahay Molina. Waxaan rajeyneynaa inaan kuu adeegno.

Caafimaadka Wanaagsan

Molina Healthcare

Luuqad Takoor-la'aan ah

QEYBTA MHW #2797-2505
MHW-05/02/2025, HCA 06/20/2025 (50854)